Habka Arjiga

Araajida loogu talagalay dugsiyada degmada ee ikhtiyaariyada Doorashayooinka Dugsiyada waxaa la isugu geeyey hal arji oo fudud oo ah arjiga Doorashooyinka Dugsiyada oo ku yaal bogga 34aad ee buuggan-warbixineed.

Fadlan Xusuusnow:

Wakhtiyada iyo nidaamka arjigu wuu Isbeddelay!
Bisha Febraayo 15 keeda ayaa ah maalinta ugu dambeysa ee qoysaska hada degmada ka diiwaangashan ay soo dalban karaan Doorashooyinka Dugsiyada

Arjiyada lala soo daaho lama qaban doono. Qoysasku waxaa la siin doonaa hal diiwaangelin oo aan dugsiga jiiraankooda ahayn. Waxaa muhim ah inay qoysasku doorashooyinkooda kala qaddariyaan, mudnaanta dugsiyadana taxadr siiyaan. Ardey kasta waxaad u buuxisaa hal arji ah, adiga oo dhammaan doorashada dugsiyada mudnaanta kala siineya sida (koowaad, labaad, iwm.).

Waxaad arjigaas si toos ah ugu dirtaa ciwaankan hoostan ku qoran:

Enrollment Options Office
4100 Normal Street, Annex 7-B
San Diego, CA 92103

Arjiga Doorashada Dugsiyada waxaad kale oo ku buuxin kartaa khadka Internetka oo ah http://sandi.net/enrollmentoptions.

Doorashadaada Garo!

Nidaamka arjigu wuxuu dhigeyaa inaad qoratid saddexda (3) dugsi ee aad mudnaanta koowaad siineysid, iyo laba (2) dheeraad ah oo aad ku daraysid, haddii la waayo saddexdii la soo dalbadeyba. Ardey kasta hal ayaa diiwaangelintiisa loo qoondeeyey, taas oo ku salleysan doorashooyinkiisa (1-5). Waalidiinta waa in lala socodsiiyaa doorashooyinka ay sameyn karaan inta aysan arjiga soo buuxinin. Fadlan waxaad akhridaa buuggan-warbixineed, kedibna waxaad wakhti siisaa sidii aad uga qeyb geli lahayd booqashooyinka dugsiga iyo bandhigyada diiwaangelinta, waalidiinta kala la sheekeyso, waxaadna arrimaha dugsiga la xidhiidha kala socotaa adiga oo booqaneya shabakada waxabarshadda degmada iyo dugsiyada. Ardeyda aan diiwaangelinta la siinin, waxay dib u soo codsan karaan sannadka xiga, haddii ay weli barnaamijkaas rabaan.

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid nidaamka buuxinta arjiga, waxaad wacdaa Xafiiska Diiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah oo telefoonkiisu yahay (619) 725-5672 ama waxaad email ugu dirtaa eoptions@sandi.net. Haddii aad xiisaynaysid dugsiyada gaarka ah (charter schools), dugsi kasta si toos ah ula xidhiidh (fiiri bogga 36aad).

Maxaa dhacaya kedib marka araajida la gudbiyo inta u dhexeysa bilaha Noofember 1 deeda ilaa iyo Febraayo 15 keeda?

1. Taariikhda iyo saacada arjiga la shabadeeyey ayaa gaadheya Xafiiska Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah.
2. Araajida ardeyda waxaa loogu kala habbeeyaa barnaamijka ardeyda siineya mudnaanta koowaad ee ugu macquulsan (Magnet, PISC, Diiwaangelinta Furan) ee doorashada koowaad, labaad, saddexaad, afraad, iyo shanaad.
3. Barnaamijyada Magnet, VEEP, iyo Diiwaangelinta Furan deeda waxaa la siin doonaa nambar nasiib ah oo koombiyuutarku lagu sameeyey, kaas oo arjiyada lagu kala soocayo heerka fasalka. Arjiyada Magnet waxaa kale oo lagu kala soocayaa cluster dugsiga sare ee ardeygu deggan yahay. Mudnaanta waxaa la siineyaa liiskan soo socda sida uu u kala horeeyo: kuwa barnaamijka ku jirey ee sii wadaneya; carruurta walaalaha ah; PISC; Arjiyada Guud (kale); kuwa deggan meel degmada ka baxsan.
4. Waalidiinta waxay Xafiiska Diiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah ka heli doonaan warqada loogu oggolaadey diiwaangelinta. Waalidiintu waa inay xafiiska Diiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah la socodsiiyaan haddii ay beddelaan ciwaanka guriga. Haddii aan sidaas la sameynin, xafiiska Diiwaangelinta Ikhtiyaariyada ahi kulama soo xidhiidhi doono. Haddii aan ardeyga wakhtiga la qabtay loo soo dirin warqad oggolaansho ah, waxaa ardeygaas laga rajeynayaa inuu dugsiga uu markaas ku jirey ama dugsiga jiiraankiisa ku yaala waxbarashadiisa ka sii wato.

Maxaa ku dhacaya araajida la soo gudbiyey intii ka dambeysay Febraayo 15 keeda?

Araajida xafiiska soo gaadha wixii 15ka Febraayo ka dambeysa lama aqbali doono, haddii qoysku uusan ku cusbeyn dugsiyada degmada ama qoysaska SDUSD oo haysta caddeymaha ah inay ciwaankoodii beddeleen, taas oo mudnaanta wax ka beddeleysa. Caddeyn ku saabsan ciwaanka cusub ayaa loo baahnaan doonaa. Araajida xafiiska soo gaadha 15kii Febraayo intii ka dambeysay wax mudnaan ah laguma siin doono taariikhda iyo wakhtiga la qabtay toona.

HADA SOO WAC!

Araajida waa in la soo gudbiya intaa u dhexeysa bilaaha

Noofember 1 deeda ilaa iyo Febraayo 15 keeda

Mudnaanta Diiwaangelinta

Mudnaantan soo socota ee muhimka ah ayaa la siineyaa mudnaanta ugu weyn ee meeleynta diiwaangelinta liiska dugsi kasta, taas oo ay ku xigto 2aad, 3aad, 4aad iyo 5aad, hadba sida ay u kala horeeyaan.

	Magnet–Bogga 3	VEEP–Bogga 22	Diiwaangelinta Furan–Bogga 23	PISC–Bogga 29
1	Sii wadista: Ardeyda Dugsiyada Dhexe iyo Sare ee waxbarashadda ka sii wadeysa dugsiyo Magnet ah oo la mid ah. (eeg boggaga 5; arjiga loo baahan yahay)	Sii wadista: Ardeyda VEEP waxay fikradooda u gudbineyaan dugsiyada ay ardeyada VEEP dhigtaan. (arji looma baahna)	Sii wadista: Ardeyda Isdiiwaangelinta Furan waxay fikradooda u gudbineyaan dugsiyada ay ardeyada Isdiiwaangelinta Furan dhigtaan. (arji looma baahna)	
2	Walaalada ilmaha is diiwaangeliyey	Walaalada ilmaha is diiwaangeliyey	Walaalada ilmaha is diiwaangeliyey	
3	Ardeyda ay buundooyinkoodu hooseeyaan ee ka soo jeeda qoysaska uu dakhligoodu liito ee ku jira barnaamijyada dugsiyada hagaajinta u baahan ayaa la siineya mudnaanta ugu sareysa ee dugsiyada Magnet ee ay buundooyinkoodu sareeyaan.	Ardeyda ay buundooyinkoodu hooseeyaan ee ka soo jeeda qoysaska uu dakhligoodu liito ee ku jira barnaamijyada dugsiyada hagaajinta u baahan ayaa la siineya mudnaanta ugu sareysa ee dugsiyada VEEP ee ay buundooyinkoodu sareeyaan.	Barnaamijka Ururka Dugsiyada Hoose ee Ardeyda waxbarashadda Hibada u leh koorsada khaaska ah ee dugsiga sare (eeg boggaga 24)	Ardeyda ay buundooyinkoodu hooseeyaan ee ka soo jeeda qoysaska uu dakhligoodu liito ee ku jira barnaamijyada dugsiyada hagaajinta u baahan ayaa la siineya mudnaanta ugu sareysa ee dugsiyada aan dib u hagaajinta u baahneyn ee loo qoondeeyey.
4	Codsiyada mudnaanta Magnet Guud ee dugsiyada cluster (eeg boggagas 4 & 8)	Codsiga VEEP Guud	Codsiga Isdiiwaangelinta Furan ee Guud	
5	Codsiga magnet ee ardeyda meel degmada ka baxsan deggan.		Codsiga Isdiiwaangelinta Furan ee ardeyda meel degmada ka baxsan deggan.	

Fadlan Xusuusnow:

- **Ciyaaraha fudud**: Warbixinta gaarka ah ee ku saabsan in ardeyda xaq u leeyahay ciyaaraha fudud iyo in kale waxaa si dakhso ah looga ogaan karaa adiga oo la xidhiidha Xafiiska Ciyaaraha Fudud ee degmada oo telefoonkiisu yahay (619) 725-7126. Xaq u lahaanshaha ciyaaraha fudud wey ka duwan tahay diiwaangelinta. Ardeygu marka uu dugsiga ka beddesho waxay saameyn ku yeelan kartaa xaq u lahaanshaha ciyaaraha fudud.
- **Carruur Haynta:** Ardeyda dugsiyada hoose ee ha'ayada carruur hayntu ay ku taalo xuduudka dugsiga uu ardeygu doortay mudnaan lama siineyo. Ardeydu waa inay si toos ah dugsiga ugu codsadaan iyagoo raacineya Warqadda Marag-kaca Carruur-Haynta (Child-Care Affidavit). Shardi maaha inay dugsiyada oo dhan aqbalayaan Warqadda Marag-kaca Carruur Haynta, waana in sannad kasta la cusbooneysiiyaa.
- **GATE Seminar**: Ardeyda loo aqoonsadey barnaamijka Gate Seminar waxay codsan karaan doorashada dugsiyada ka baxsan deegaankooda oo ikhtiyaariyo ah. Mudnaan khaas ah oo la siineyo ma jirto.
- **Waxbarashadda Khaaska ah:** Ardeyda ku jirta barnaamijka waxbarashadda khaaska ahwaxay soo dalban karaa doorashada dugsiyada. Mudnaan khaas ah oo la siineyo ma jirto.
- **Beddelka:** Ardeydu waa inay ku jiraan dugsiga ay iska diiwaangeliyeen ilaa dhammaadka sannadka. Ardeygu si uu beddelka xaq ugu yeesho, codsiga beddelka waa in la helaa markaas ama ka hor maalmaha shaqada ugu dambeysa inta ka horreysa ee aan dugsiga la furin ee Sebtember. Beddelka la soo codsado wakhtiyada uu dugsigu socdo lama ansaxin doono ilaa labada maamule ay wada saxiixaan. Codsiga beddelku wuxuu oggolaaneyaa inuu ardeygu ku laabto dugsiga jiiraankiisa ah.